

Ku soo dhowoow Rugta Buugagga Degmada Nacka

Rugta buugagga waxaa ka heli kartaa buugag ku qoran af-iswiidish iyo luqooyin kale. Waxaa ka heli kartaa cajallooyin afka lagu barto "språkkurser", cajallooyin sheekoooyin ku duuban "kassettböcker", wargeysyo iwm.

Qofku waa innnu sita kaarka buugagga lagu aamaahdo. Ha na illowin warqadda aqoonsiga. Kaarka waa lacag la'aan, buug na waad kaga aamahan kartaa dhammaan goobaha buugagga laga aamahado oo ku yaalo degmada Nacka.

Ogow! adiga ayaa ka masu'l ah kaarkaaga iyo wixii lagu aamahdo.

Waa inad maamulka rugta ogeysiisaa haddii u kaarka ka lummo.

Buugagga lacag la'aan ayaa aamhan kartaa. Haseyeeshe, haddii aadan buugagga soo celin sida hadba ku qoran warqadda waxaad bixin doontaa magdhow.

Haddii rugta ay kugu leedahay lacag ka badan 100 koroon, waxaa laga joojinyaa fursadda aamahsashada.

Haddii buug u ka lummo waa in ad bixisa qiimahiisa.

Taariikhda dib u soo celinta buugagga waxay ku qoran tahay warqadda "kvitto" lagu siiyay markii ad buugagga aamaah tahay.

Haddii xilliga u kugu filnayn, waxaad labo jeer codsan kartaa in lagu kordhiyo. Booqasho amase xiriir talayfoon ayaa ku codsan kartaa in lagu kordhiyo xilliga. Teeda kale waxaad booqan kartaa goobta internetka www.nacka.se

Haddii buugagga qaarkood aadan ka helin rugta buugagga degmada Nacka, waxaad ka aamahan kartaa rug kale.

Shaqaalaha Rugta Buugagga Degmada Nacka waxay had iyo jeer diyaar u yihiin in ay ku caawinyaan!